**WARGELINTA GUDDOOMIYAHA**
**WAAXDA ADEEGYADA KORMEERKA**
**MAGAALADA BOSTON**

**Nambarka:** 2024-05
**Taariikhda:** 4ta Diseembar, 2024

---

**Mawduuca:** Dejinta Shuruudaha Arjiga, Nidaamyada Maamulka iyo Xeerarka Maareynta ee ku saabsan Shatiyeynta Lahaanshaha iyo Dhaqaaleynta Shinnida Malabka sida waafaqsan Sharciga Magaalada Boston, Xeerarka Cutubka 16-1.27

---

**Ujeedada:** Wargelintaan waxa loo soo saaray si loo dejiyo shuruudaha arjiga, habraacyada maamulka iyo xeerarka maamulka ee khuseeya shatiyeynta hawlaha dhaqaaleynta shinnida.

---

**Go'aanka:**

Iyadoo la raacayo Sharciga Magaalada Boston, Xeerarka, Cutubka 16-1.27, Waaxda Adeegyada Kormeerka waxay soo saartaa sharciyadaan iyo xeerarkaan ku saabsan diiwaangelinta hawlaha dhaqaaleynta shinnida ee Magaalada Boston. Dhamaan goobaha ama xaruumaha la doonaya in lagu dhaqaaleeyo shinnida malabka waa inay raacaan shuruudaha soo socda.

**A. Qeexitaanno**

I. Ujeedooyinka Wargelintaan dartiis, qeexitaanada waa inay waafaqsanyihiin qeexitaannada lagu tilmaamay Sharciga Magaalada Boston, Xeerarka, Cutubka 16-1.27(b), markii lagu daro qeexitaannada soo socda:

A. *Ku dhaqaaleynta shinnida meel dhulka la siman* - waxa loola jeedaa hawl walba oo shinni dhaqaaleyn ah oo lagu sameynaayo meel la siman dhul ahaan goobta, oo ay ka mid yihiin daarada hore gudaheeda ama korkeeda, daarada dhinac ah, ama daarada dambe ama goob looga dhaqaaleyn karo meel la siman dhul ahaan waddada/marshibiyeedka ku dhegan goobta.

B. *Ku dhaqaaleynta shinnida saqafka kore* - waxaa loola jeedaa hawl walba oo shinni dhaqaaleyn ah oo lagu sameynaayo saqaf kore ama meel kale oo lamid ah.

II. Howlaha dhaqaaleynta shinnida lama ogola in lagu sameeyo deyraha guriga ama barandooyinka aan ka ahayn kuwa meel dhulka la siman ama saqaf kore.

**B. Habka Diiwaangelinta Hawlaha Dhaqaaleynta Shinnida**

Dhamaan hawlaha lagu dhaqaaleynaayo shinnida waa inay u hoggaansanaadaan nidaamka soo socda:

I. <u>Xaqiiji in ruqsadda dhismaha loo baahan yahay:</u>

- *Hawlaha ku dhaqaaleynta shinnida meel la siman dhulka* - wax ruqsad dhismo oo dheeri ah loogama baahna. Hawlaha ku dhaqaaleynta shinnida meel dhulka la siman waa inay si toos ah ugu sii gudbaan Waaxda Adeegyada Kormeerka ee Qeybta Caafimaadka si ay u buuxiyaan foomka diiwaangelinta, iyadoo la raacayo qaybta (II) ee Wargelintaan.

- *Hawlaha ku dhaqaaleynta shinnida saqafka kore* - waxay u baahan yihiin mid ka mid ah kuwan soo socda:

    - **Balanbalooyinka saqafka kore ee horay u jiray oo ruqsadeysanaa** - foom yar ee ruqsada dhismaha ayaa loo baahan yahay si loogu daro saxaaradaha shinnida balanbalada saqafka kore ee horay u jiray oo ruqsadeysanaa. Arjiga ama codsiga waa in lagu soo qiimeynta culayska inta ay qaado (miisaanka) ee uu qiimeeyay injineer xirfadle ah si uu u caddeeyo in miisaanka dheeraadka ah ee saxaaradaha shinnida aanan wax u dhimi doonin qaab-dhismeedkii hore u jiray.

    - **Balanbalooyinka saqafka cusub , ama ku darista saqafka hawlaha dhaqaaleynta shinnida  ee aan si kale loo ogolayn degitaanka** - foom dheer ee ruqsada dhismaha ayaa loo baahan yahay si loo dejiyo hababka ku haboon ee galitaanka  ama tagista saqafka kore, nidaamyada badbaadada, iyo culeyska inta qof ee ay qaado.

    - Dhamaan hawlaha dhaqaaleynta shinnida ee saqafka kore waa inay raacaan Wargelinta Guddoomiyaha CB2022-02 - *Nidaaminta* gelitaanka ama tagista *Meelaha saqafka kore ah ee dhismayaasha leh* qaybo deggaano ah.

II. <u>Foomka Diiwaangelinta Dhaqaaleynta Shinnida:</u>

Buuxi foomka Diiwaangelinta Dhaqaaleynta Shinnida ee Qaybta Caafimaadka ISD (" *Codsiga Ruqsadda* Dhaqaaleynta Shinnida Malabka")

- Codsiga ama arjiga wuxuu u baahan yahay dukumiintiyadaan soo socda:

    - Foomamka diiwaangelinta oo dhammaystiran
    - Sawirka qaabdhismeedka saxaaradaha la rabo in la isticmaalo:
        - Sawirka ayaa noqon kara mid gacanta lagu sawiray ilaa heer uu muujinayo dhamaan masaafooyinka kala dheereynta lagu dabaqi karo ee lagu sheegay CBC 16-1.27(D)
        - Sawirka waa inuu lahaadaa dhamaan cabbirrada dhirirka iyo mugga oo fiit ah ee cabbir ahaan ah, oo ay ku jiraan qoraallada dhamaan darbiyada, deyrarka iyo/ama kala saarayaasha u dhexeeya meesha la rabo in shinnida lagu dhaqaaleeyo iyo meelaha ama guryaha ku dhagan, oo ay ku

jiraan masaafooyinka kala dheereynta ee xariiqmaha goobta.

- Foomka isdiiwaangelinta waa in uu ku jiraa cinwaanka boosaska ugu dhow ee ku dhegan goobta
- Foomka isdiiwaangelinta waa in uu muujiyaa hadii hawsha ku dhaqaaleynta shinnida ay tahay saqaf kore /qaab-dhismeed iyo in kale, haddii ay sidaas tahay, waa in la soo raaciyaa ruqsadda ay bixisay Qaybta Dhismayaasha ee Waaxda Adeegyada Kormeerka taas oo muujinaysa oggolaanshaha hawsha dhaqaaleynta shinnida la sheegay ee qaab dhismeed saqaf korkiisa ah ee meesha markaa la rabo in shinnida lagu dhaqaaleeyo
- Foomka isdiiwaangelinta waa inuu qeexaa marinka ay shinnida ku duuli doonto ee diyaarsan ee hawsha dhaqaaleynta shinnida

- Qasab ma ahan in sawirada uu shaabadeeyo Xirfadle Diiwaangashan ee Naqshadeynta oo ka socda Massachusetts

- Ugu soo gudbi arjiga iyo sawirka Qaybta Caafimaadka ISD iimayl ahaan ISDHealth@boston.gov , ama geey dabaqa 4aad ee 1010 Massachusetts Avenue, Boston, MA 02118

III. Diiwangelinta Dhaqaaleynta Shinnida; Bixinta Khidmadaha :

- Khidmada dhamaan isdiiwangelinnada dhaqaaleynta shinnida waa in ay ahaataa $25.00

IV. Shuruudaha Kormeerka iyo Habraacyada:

Waaxda Adeegyada Kormeerka ayaa baari karta hawl walba oo shinni dhaqaaleyn ah, ka hor inta aan la ansixin ama markii la codsado iyada oo loo marayo cabasho loo gudbinaayo Waaxda, waxana laga yaabaa in ay talaabo ka qaado xadgudub walba oo xeerar ah iyada oo la raacayo awoodda Xeerka Magaalada Boston, Xeerarka, Cutubka 16-1.27, oo ay ka mid tahay iyada oo loo marayo soo saarista digniin qoraal ah oo ku saabsan u hoggaansanaanta, joojinta isdiiwaangelinta, iyo/ama qaadista tillaabo sharci si ay uga hortagto jebinta shuruudaha ruqsadda iyada oo loo marayo in kormeer la sameeyo.

## C. Shuruudaha Kale

*U Hogaansanaanta Shuruucda Kale iyo Xeerarka* - Hawlaha ku Dhaqaaleynta Shinnida saqafyada dushooda waa inay u hoggaansanaadaan Xeerka Magaalada Boston, Xeerarka Qaybta 9-9.13, *Nidaaminta* Gelitaanka ama Tagista *Meelaha Saqafka sare ah ee* Dhismayaasha leh *Qaybo Deegaano ah* iyo Wargelinta Guddoomiyaha CB2022-01, *Nidaaminta* Gelitaanka ama Tagista *Meelaha* Saqafka kore ah *oo leh* Qaybo Deegaano ah.

## D. Xadgudubyada iyo Ganaaxyada

Qof kasta oo lagu helo inuu ku hawlan yahay Hawlsha dhaqaaleynta Shinnida ee ku xad-gudbay Qaybta 16-1.27 ee Xeerka Magaalada Boston ama lagu helo inuu ku xad-gudbay shuruudaha isdiiwaangelintooda ayaa loo soo saari karaa digniin qoraal ah iyo/ama kala noqoshada ama joojinta isdiiwaangelinta. Magaalada Boston ayaana tillaabo sharci ah qaadi karta si ay uga hortagto ku xadgudubka shuruudaha diiwaangelinta iyadoo loo marayo in kormeer la sameeyo.

---

**Saxiixa**

_________________________
Tania Del Rio, Gudoomisada Waaxda Adeegyada Kormeerka /

_________________________
Daniel Prendergast, Kaaliyaha Gudoomisada Qaybta Caafimaadka
Waaxda Adeegyada Kormeerka

______________________
Taariikhda

______________________
Taariikhda